SOO DHOOFID QOYS

Haddii qof qoyskaaga ka mid ah uu Norway ku noolyahey, ama aad dooneyso inaad reer isla yeelataan qof halkan deggan, waxaad codsan kartaa oggolaansho isu imaansho qoys si aad halkan u timaado si aad iyada ama isaga ula noolaato.

Qofka Norway deggani waa inuu heystaa dhalasho noorwiiji ah, dhalasho dalalka waqooyiga ah ama uu heystaa degganaansho rasmi ah (permanent oppholdstillatelse), (Berigii hore la odhan jiray bosettingstillatelse)) ama uu heystaa oggolaansho joogitaan oo lagu heli karo degganaansho rasmi ah.

Waa ayo xubnaha qoys ee dhow ee xaqa u leh in la siiyo oggolaanshaha qoysku ku soo dhoofi karo ?

- Labada is-qaba iyo lammaanaha diiwaan gashan
- Kuwa laba sano wada noolaa
- Labada wadanool ee carruur isu leh (xataa haddii eyna wada nooleyn in ka badan 2 sano).
- Carruurta da'doodu ka yar tahey 18 sano
- Waalidka carruur noorwiiji ah masuul ka ah, ama waalid xaq u leh iney isla joogaan carruur Noway joogta.

Xubnahee qoys ee kale ayaa heli kara oggolaanshaha qoysku ku soo dhoofi karo ?

- Qofka guursan doona qof deggan Norway lix bilood gudahood marka uu Norway soo galay kadib.
- Hooyo keligeed ah ama aabbe keligii ah oo ka weyn 60 sano oo aanay dalkii hooyo u joogin qoys dhow
- Laba isla nool ee carruur wada sugaya.
- Carruur ka weyn 18 sano oo aan xaas laheyn lana masruufo, oo dalkiii jooga ama ku hadhey iyada oo reerka intii kale deggenaansho laga siiyey Norway.
- Walaalo isku aabbe iyo isku hooyo ah oo ka yar 18 sano oo aan waalidkood nooleyn, ama qof kale oo daryeela u joogin dalkii hooyo ama dalka ay joogaan.

Shuruudaha dhaqaale iyo guri (shuruudaha masruufka)

Sida caadiga ah waa in qofka Norway joogaa uu ku masruufo. Taa macnaheedu waxa weeye in qofka Norway joogaa uu leeyahey ugu yaraan dakhli ah 225 400 koroone sannadkii inta aan cashuurta laga jarin ka hor (laga bilaabo 1
Junyo 2010). Waxa kale oo shuruud ah in dakhliga qofka Norway joogaa uu sidan oo kale ama ka badan ahaa sannadkii horena. Waxa intaa dheer in aanuu qofku qaadan lacagta ceydha sannadkii ugu dambeyey Haddii adigaaga waxa codsanayaa aanad aheyn xubin dhow oo ah qoyska qofka Norway jooga (eeg xagga sare), markaa waa shuruud inuu/iney guri Norway idiinka diyaariyaan.

Shuruud afar sanno oo shaqo ama waxbarasho Norway ah.

Haddii qofka Norway joogaa uu yahey mid u soo guurey waxaa shuruud looga dhigi karaa inuu qofku ka shaqaynayey ama wax ka baranayey Norway si buuxda afar sano. Waxey tani khuseysaa haddii aad u doonantey, qabto ama tahey qof la noolaa ama ey carruur wada sugayaan qofka Norway jooga, iyo in aad reer wada dhisateen kadib markii uu qofka Norway joogaa u soo guurey Norway. Haddii uu qofka Norway joogaa yahey ama noqdey noorwiiji ama udhashey dalalka waqooyiga, loogama baahna shuruud sidan oo kale ah.

Dukumenti noocee ah ayaan ku lifaaqayaa codsiga?

Shuruudaha nooca dukumentiga aad ku lifaaqeysaa, wey u kala duwan yihiin dalalka waxeyna isla beddeli karaan waqtiga. Sidaa darteed waa inaad la xidhiidho safaaradda ama qunsulka Norwey ee dalka aad ka soo codsaneyso.

Waa inaad ku lifaaqdaa kuwan :

- Foomka codsiga oo la wada buuxiyey lana saxeexey
- Warqadda dhalashada
- Koobbiga dhammaan bogagga baasaboorka (xataa bogagga aan la isticmaalin)
- Caddeyn muujineysa waxa aad adiga iyo qofka Norway deggan isu tihiin.
- Caddeyn muujineysa in qofka Norway deggan uu ku masruufayo.
- Caddeyn muujineysa in qofka Norway deggan uu kuu hayo meel aad ku noolaato (sida kontaraag guri kiro ah ama la leeyahey).
- Caddeyn muujineysa in qofka Norway joogaa uu shaqeeyey ama waxbaranayey ugu yaraan afar sanno (haddii aad tihiin dadka shuruuddan looga baahan yahey).
- Sawiro baasaboor

Intaa waxa dheer in la isaga baahdo shuruudo dheeraad ah oo khuseeya codsadayaasha qaar.
Safaaradda ama booliska ayaa haya macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dukumentiyada looga baahan yahey codsiyada qaar.
Waraaqaha aad ku lifaaqeysaa waa iney ahaadaan orijinaal ama koobi uu tasdiiqiyey xafiis dawladeed, haddii aan wax

kale oo gaar ah laguu sheegin. Dhammaan dukumentiyada waa in loo turjumo norwiiji ama ingiriisi, uuna turjumey qof loo aqoonsanyey turjumaan .

Xaggee ayaan ka codsan karaa?
Qofka codsanaya soo dhoofidda qof qoyska ah , waa in codsiga laga xareeyo safaaradda ama qunsulka Norway ee dalkaaga, ama dalka aad joogtey lixdii bilood ee ugu danbeeyay ee aad ku laheyd oggolaanshaha joogitaanka.

SU'AALO CAADI AH

Wakhti intee le'eg bay qaadataa in laga baraandego codsiga?
Muddada ka baaraandegga codsiga waxaad ka heleysaa www.udi.no/saksbehandlingstider, ama la xidhiidh UDI. Waxa aad sidoo kale macluumaad ku saabsan waqtiga uu codsigu qaadanayo ka heleysaa safaaradda Norway.
Si aad uga hortagto in waqtiga codsigu qaadanayaa ka dheeraado inta loogu talogaley, waa inaad si taxadir leh u buuxbuuxsio foormka kuna lifaaqdo dhammaan dukumentiyada lagu weydiiyey.

Ma u dhoofi karaa Norway ka hor inta aan oggolaansho dhoofid qoys la i siin?
Caadi ahaan uma dhoofi kartid Norway ka hor intaan oggolaanshaha lagu siin. Haddii aan lagaaga baahneyn fiise si aad Norway u timaado, mararka qaarkood waad iman kartaa Norway kana codsan kartaa halkan. Waxey tani khuseysaa tusaale ahaan haddii aad isqabtaan ama isla nooleydeen in kabadan laba sanno, ama qof aad la nooshahey oo carruur isu leedihiin ama sugeysaan uu Norway ku nool yahey. Qofka Norway deggan waa inuu yahey noorwiiji ama u dhashey dalalka waqooyi, ama heysto deggenaansho rasmi ah ama uu heystaa oggolaansho joogitaan oo lagu heli karo deggenaansho rasmi ah.

Inta badan carruurta aan noorwiijiga aheyn ee aad adiga iyo qofkaaad isqabtaan ee Norway deggan isu leedihiin waxey ka codsan karaan Norway dhexdeeda. Waxey tani khuseysaa oo kale carruurta qof xidhiidh hore idinka dhexeeyey isu leedihiin oo aad caddeyn karto inaad adigu masuul keligaa ka tahey carruurta ama oggolaansho ka heysato qofka kale ee waalidka ah in ay carruurtu Norway ku noolaan karto. Haddii shaki kaaga jiro in adiga iyo carruurtaadu Norway u dhoofi kartaan kahor inta aan oggolaansho la idin siin, waa inaad la xidhiidho safaarada Norwiijiga ee kuugu dhow ama la xidhiidh UDI.

Ma kharash ayaa ku baxa codsashada soo dhoofidda qoyska?
Haa, kharash ayaa lagaaga baahanyey codsiga soo dhoofidda qoyska. Kharashka waxa la siinayaa booliska ama safaaradda marka la xaraynayo codsiga. Carruurta da'doodu ka yar tahay 18 sano ma bixinayaan wax kharash ah. Kharashka la bixinayo hadba intuu le'eg yahay ka eeg bogga internetka ee UDI-da ama la xidhiidh saldhigga arrimaha dibedda ee kuugu dhow.

Waxaa kharashka lagu bixin karaa lacag caddaan ah ama kaadh. Sidoo kale kharashka hore ayaa loo sii bixin karaa (bangiga ayaa laga sii bixin karaa) dabadeedna risiidhka ayaa lagu lifaaqi karaa codsiga. Taas oo la samayn karo haddii codsiga lagu dirayo boostada iyo haddii gacanta laga geynayo labadaba. Lambarka bangiga waxa laga heli karaa booliska/safaaradda.

Ma suurtogal baa inaan helo oggolaansho isu soo dhoofid qoys haddii xubinta qoyskayga ee Norway joogtaa leedahey oggolaansho joogitaan oo aan lagu heli karin degganaansho rasmi ah?
Haa, laakiin tani waxey khuseysaa oo keliya qof aad isqabtaan, isla nooshiin iyo carruurta. Waxa ku yaal oggolaanshaha qofka Norway jooga in oggolaanshihiisa ama oggolaanshaheeda la oggol yahey in qoysku u iman karo iyo in kale.

Ma inaan cusbooneysiiyaa oggolaanshaha joogista-iyo shaqada ee la igu siiyey isu soo dhoofidda qoys?
Oggolaanshaha isu keenidda qoyska waxa la bixiyaa hal sano markiiba. Waa muhiim in la codsado cusbooneysiinta bil ka hor inta aan oggolaanshuhu dhicin. Marka la cusbooneysiinayo waa in la bixiyo kharash (Carruurta da'doodu ka yar tahay 18 sano ma bixinayaan wax kharash ah). Saddex sano ka dib waxaad codsan kartaa oggolaansho deggenaansho oo rasmi ah.

Cabasho ma ka qaadan karaa haddii la soo diido codsiga?
Haa. Haddii aad cabasho ka qaadato, waxaa cabashada ka baaraandegaya UDI-da, haddii ay UDI-du wax ka beddeli weydo go'aankeedii hore waxa markaa cabashada loo sii gudbinyaa guddiga cabashada arrimaha ajinebiga (UNE). Ka baaraandegida cabashadan waa bilaash.

Miyaa la iska bixiyaa kharashka dhoofka ee xubnaha qoyska ee lagu oggolaadey isu soo dhoofid qoys?
Caadi ahaan maya. Dadka la siiyay magangelyo siyaasadeed ama ah qaxooti ay Norway soo qaadatay, oo uu soo galo dakhli hoose amaba aan wax dakhli ahi soo gelin, oo keliya ayaa laga bixin karaa kharashka dhoofka ee xubnaha qoyska.

Ma doonaysaa inaad intaan in ka badan ka ogaato soo dhoofidda qoys ee Norway?
Haddii aad doonayso inaad hesho macluumaad intan ka badan ka oo ku saabsan soo dhoofidda qoyska, waxaad la xidhiidhi kartaa saldhigga arrimaha dibedda ee Norwey ee kuugu dhow. Haddii aad ku sugan tahay Norway, waxaad la xidhiidhi kartaa UDI. Hoos ka eeg meesha lala xidhiidhi karo.

Utlendingsdirektoratet (UDI)
Postboks 8108 Dep.
N-0032 Oslo
Kontoradresse: Hausmannsgate 21

Telefon: (+47) 23 35 15 00
Faks: (+47) 23 35 15 15
www.udi.no
E-post: udi@udi.no

Last updated: 15.02.2011